Xeerarka iyo shuruudaha mudada kirada

Maayo 2009

Tusmooyin

Kusoo dhawoow London Borough of Waltham Forest **2**
Wuxuu khuseeyaa xeerarka iyo shuruudaha mudada kirada..... **3**
Qodobka 1 – Masuuliyadaha Kiraystaha..... **6**
- Sawirada aqoonsiga..... **6**
- Inla bixiyo kirada..... **6**
- Inla bixiyo daymihii hore..... **6**
- Isticmaalka aqalkaaga..... **6**
- Wargalinta isbadalka dadka kugula nool aqalka..... **7**
- Xadidaado kusaabsan wareejinta mudada kiradan..... **7**
- Siikiraynta iyo qayb kamid ah kirayn..... **7**
- Xaalada aqalkaaga..... **8**
- Goglida dhulka..... **9**
- Beerta.. ..... **9**
- Khataraha dabka, ilaalinta gaasta iyo gaasta lashito **10**
- Qashinka iyo dib u warshadaynta..... **10**
- Meelaha lawadaago iyo nadiifinta kaabadaha..... **10**
- Meelaha saqafka sare ah **11**
- Xayawaanka aqaljoogta ah **11**
- Dabeecada..... **11**
- U ogalaanshiyaha dadka uu koonsilku usoo igmay inay aqalkaaga yimaadan..... **13**
- Usheegida koonsilka deegaanka wixii kusaabsan cusbonaysiin..... **14**
- Walxaha laga soo tuurayo aqalka..... **14**
- U ogalaanshaha inay soogalaan dad aanad garanayn..... **14**
- Baarkinka gawaadhida kale iyo cusbonaysiinta baabuurta..... **14**
- Dhamaadka mudada kirada **16**

Qodobka 2 – Xuquuqqahaaga..... **17**
- Aqoonsiga shaqaalaha koonsilka, wakaaladahooga maamul iyo qandaraaslayda..... **17**
- Cusbonaysiinta..... **17**
- Samaynta badalaadaha iyo fulinta cusboonaysiinta..... **18**
- Kirada lagu saarayo markuu kulayliyahaagu jabo..... **18**
- Burinta heshiiskan..... **18**
- Isbadalada heshiiskan..... **19**

Qodobka 3 – Heshiisyo dheerada oo udhexeeya adiga iyo koonsilka..... **20**
- Isbadalka kirada..... **20**
- Adeega ogaysiisyada..... **20**
- Daynta shaqsiyadeed iyo ta lawadaago..... **20**
- Xuquuqda koonsilka deegaanka ee ay ‘kubilaaban’..... **20**
- Horumarinta iyo isbadalada ay keenan koonsilku..... **20**
- Hadii aad dhimato iyo mudada kiradu inaanay si caadiya ugu wareegayn ka kugu xiga..... **21**

Qodobka 4 – Wakaalada maamul ee koonsilka..... **22**
CODSIGA TURJUMAADA HALKAN..... **23**

Kusoo dhawoow London Borough of Waltham Forest

Waxaanu rabnaa in aad ku raaxaysato ku noolaashaha aqalkaaga Waltham Forest Council.

Waxa aanu rumaysanahay in ay muhiim tahay in aanu kuu cadayno karno lagabilaabo bilawga mudada kiradaada waxaad naga fili karto iyo dhinacakale waxaanu kaa fili doono adiga intuu kuu kiraysan yahay aqalku. Qoraalkani waxa uu kuu sharaxayaa xuquuqdaada iyo masuuliyadahaaga markaad kirayste tahay iyo masuuliyadaha naga kaa saaran markaanu mulkiilaha guriga kireeya nahay iyada oo lagu dabaqaayo heshiiska mudada kirada.

Waxaanu balanqaadaynaa in aanu u hubino in aqalkaaga iyo adeega aanu bixinaynaa ay yihiin kuwo tayadoodu sarayso. Waxaanu rabnaa in aad kudhex noolaato jaar nabad ah kana madax banaan dhaqamada lidiga ku ah bulshada. Waxaanu kaa filaynaa in aad ilaaliso aqalkaaga iyo in aad ula dhaqanto jaarkaaga sidaad jeclaan lahayd in laguula dhaqmo. Waa in aad kiradaada iyo adeegyada kale ee lagugu soo dalaco wakhtigooda ku bixiso.

Kuwani waa rajooyin suurto-gal ah. Hadii aanu ku guuldaraysano in aanu fulino masuuliyadahayaga uu dhigayo heshiiskani, waxaanu kaa filaynaa in aad noosheegto nana siiso fursad aanu ku saxno. Hadii dhinacaaga aad kajabiso heshiiska waanu kuu sheegi doonaa waanan kusiin doonaa fursad aad kusaxdo. Hadii aad ku guul daraysato in aad fursadaada qaadato kadib waxaanu kaa qaadi doonaa ficil sharci ah waanad waayi doontaa aqalkaaga.

Hadii fikrada koonsilka deegaanka, adiga, ama qaarkamid ah qoyskaaga, ama martidaada, ay ku cadaato inay aad ujabiyaan heshiiskii guriga aad kiraysatay (tusaale ahaan, isticmaalida ama u ogalaanta aqalkaaga in loo isticmaalo ka ganacsiga mukhadaraadka, ku cadaato waxyeelo khatar ah ama u isticmaalida aqalkaaga dhilaysiga ama ujeedoyinka kale ee aan sharciga ahayn i.w.m) lagama yaabo inuu koonsilku kuu ogalaado fursad aad kusaxdo waxaana laga yabaa inay si dhakhso ah u bilaabmanto habkii lagaaga saari lahaa aqalka.

Waxaanu dareemaynaa habkan talaabo ka qaadida adag inuu saxyahay si aan u hubino in dhamaan dadka dagaankii ay kunoolaan karaan meel dagan oo nabada ah, kuna raaxaystaan fa iidada aqalka ay kireyaan Galuhu deegaanku iyo inay farxad ku dareemaan degaankooda. Waxaanu rabnaa in aanuu hore u marino tayada guud ee nolosha dhamaan dadka deeganka ah.

Markaa qoraalkani waa muhiim, fadlan si taxadir leh u akhri xasuusnowna in aad ku ilaaliso kan iyo Heshiiskaagii Kireysiga labadaba meel xafidan.

Wuxuu khuseeyaa xeerarka iyo shuruudaha mudada kirada

Xeerarka iyo shuruudaha mudada kirada

Buugan yari waxa uu kuu sharxayaa xeerarka iyo shuruudaha aqalka kuu kiraysan. Hadii aqal hore kaaga kiraysnaa koonsilka deegaanka marka 4 may 2009 laga gaadho, mudadaada iyo shuruudaha aqalka kuu kuraysan dhamaantood waa lagu badalayaa, iyodoon waxba laga soo reebayn, shuruudahan laguugu sharaxayo bogga 6 ilaa 19 ee buugan yar.

Noocyada mudooyinka kirada

Waxa jira laba noocyada mudooyinka kiraysiga ee koonsilka degmada ah oo guud.

Waxay kala yihii:

- mudada kiraysiga ee **hordhaca ah**
- Mudada kiraysiga ee **damaanada ah**

Marka mudada kiradaada la aqbalo, heshiiska aqal kiraysigaagu waxa uu cadayn doonaa in laguu ogalaaday mudada kiro ee hordaca ah ama damaanada ah.

Mudooyinka kiraysiga ee hordhaca ah

Xilaga kirada hordhaca ah aad ku jirto waxa aad leedahay **xuquuq sharci oo ka yar** ta kiraystaha aqalka damaanada ah. Taas waxa sicad loogu muujiyay calaamadahan xaga hoose ee buugan kuyaala/calaamada tilmaanta:

Kiraystaha Hordhaca ah MA LAHA xuquuqdan.
Waxaad xuquuqdan heli kartaa hadii kiraysato damaanad ah aad noqoto.

Hadii aad tahay kirayste aqal hordhaca ah, qaybta kutaal xaga hore ee Heshiiska Mudada kirada waa la dhamaystiri doonaa iyadoo lagu muujinayo xiliga aqal kiraysiga hordhaca ah uu ku egyahay hadaanu jirin heshiis jabin.

Aqal kiraysigaaga hordhaca ahi waa **mudo tijaabo ah**. Waa in aad noo muujisaa in aad tahay masuul kufilan ilaalinta hantida. Si taas loo sameeyo waa in aad:

- **u dhaqmin si bulshada ku lid ah, iyadoo dadka kale ku keenaysa rabshad iyo kadeed;**
- **bixisaa kiradaa wakhtigeeda;**
- **ilaalisaa hantida; iyo**
- **adeecdaa dhamaan mudooyinka iyo shuruudaha kale ee laguugu sharaxayo qoraalkan.**

Marka aad tahay kirayste aqal hordhaca ah waxaa lagaaga saari karaa si aad uga dhakhso badan aadna uga fudud hadii aad tahay kirayste aqal damaanad ah hadii aad adeeci waydo mudooyinka iyo shuruudaha aqalka kuu kiraysan.

Hadii aanad u hogaansamin shuruudaha mudadaada Kirada hordhaca ah, Koonsilku deegaanku waxa kale uu ikhtiyaar u leeyahay in uu kordhiyo mudadaada Kirada hordhaca ah lix bilood oo dheerad ah.

Ka hor inta aan inta ficilkan lagaaga saarayo ama laguugu kordhinayo mudada kirada hordhaca ah aan la qaadin, koonsilku deegaanku waa inuu kuu sheegaa dareenkiisa. Adiguna waxaad xaq u leedahay in aad codsato go'aamada in dib loo eego si loo qaado ficil lagaaga saarayo ama laguugu kurdhinayo mudada kirada hordhaca ah.

Koonsilku deegaanku waxaa kale oo uu ka dalban karaa maxkamada amar kasaarid ah. Koonsilku waa inuu kuu sheegaa waxaa lagaaga saarayo iyo in aad xaq uleedahay in aad codsato dib u eegid lagu samaynayo go'aankaa, lakiin koonsilku uma baahna inuu ka dhex cadeeyo maxkamada inay caqli gal tahay in lagaa saaro aqalka.

Hadii koonsilku aanu wax ficila kaa qaadin taas waxay kugu hogaaminaysaa kordhin lagu sameeyo mudadii kirada hordhaca ahayd ama in aad sii daganaato aqalkaaga, waxaanad si caadiya u noqonaysaa kirayste damaanad ah tariikhda laqoro heshiiska mudada kirada.

Hubso in aad akhriday oo aad fahantayna buuga yar "Hagaha mudada Kirada hordhaca ah". Waxaa uu qeexayaa habka koonsilku ay tahay inuu raaco haduu rabo inuu kaa saaro aqalka. Nuquladuna waxay diyaar kuyihiin goobahayaga diwaangalineed ama waxaad ka helaysaa Sarkaalka Adeegyada Kiraystaha.

Hadii aad dhimato adigoo wali ah kirayste hordhaca ah, qofka xaqa uleh inuu 'lawareego' mudadii kiradaada, wuxuu isna noqonayaa kirayste hordhaca ah. Waxay noqon donaan kirayste damaanad ah tariikhda ka muuqata xaga hore ee heshiiskan sheegaya inuu koonsilku aanu qaadin talaaboyin lagu dhamaystirayo ama lagu balaadhinayo mudada kirada hordhaca ah

Mudada kirooyinka ee damaanad ah

Hadii aad usoo wareegaysid hanti adigoo kasoo wareegay hantikale ooy leedahay London Borough of Waltham Forest adigoo kujiray kiro damaanad ah ama hadii aad soo wareegayso mar aad tahay kirayste ay damaanad qaadeen mulkiilaha guriga kireeya ee diiwaan gashan sida Ururrada Guryenta. Mudada kiradaadu waxay si

toos ah u noqon doontaa mid damaanad ah. Maaha in aad noqoto kirayste hordhaca ah.

Hadii aad tahay **kirayste damaanad** ah, waa in aad wali ugu dhaqantaa si masuulnimo ah ilaalisaana shuruucda Heshiiskan. Hadii anad sidaa samayn, Koonsilku wuxuu xaq uleeyahay inuu ka codsado Maxkamada inay soo celiso daganaanshiyaha hantida ama inay hoos ugu soo rido mudadaadii Kirada Damaanad ahayd mudo kiro ka xuquuq yar (tan waxa looyaqaanaa Kiraysiga Hoos loo riday). Ka hor inta aan latagin Maxkamada, Koonsilku waa inuu kusiiyaa Ogaysiiska Raadinta Mulkiyada (hadii aanay maxkamadu ku raacin inay suurto-gal tahay in sidaas la sameeyo) ama Ogaysiiska Lagu rabo Hoos u ridida mudadii kiradaada, iyadoo lasharaxayo asbaabaha aanu Ogaysiiska kuu siinayno. Koonsilku waa inuu ku qanciyaa Maxkamada inay jiraan asbaabo wanaagsan taasoo aqalka lagaaga saarayo ama larabo in hoos loorido mudaadii kiradaada. Koonsilku waa inuu markale ka dhaadhiciyaa Maxkamada inay suurto-galtahay in aqalka lagaa saraa. Waxaad xaq u leedahay in aad kiiskaaga soo dhigto maxkamada horteeda, qaadiga ayaa dabadeedna go'aaminaya hadii uu Koonsilku kaasarayo aqalka ama uu hoos loo rido mudada kiradaada

Hadii aad dhimato xili aad tahay **kirayste damaanad** ah, qofka xaqa uleh inuu lawareego mudadii kiradaada, waxay sidhakhso ah u noqonayaan kirayste damaanad ah. Warbixin dheerada oo kusaabsan xuquuqda ka kugu xiga, fadlan codso nuqul ah "**hagaha kuxigeenka"**

Mudada kiro ee lasiinayo qof kayar da'da 18 sanadood

Mudada kiro kasta oo lasiiyo qof ka yar da'da 18 sano waxa shuruud u ah in qof masuuli uu saxeexayo heshiiskaas ah in uu iyaga matalo si damiin ahaana. Qofkaasi wuxuu aqbalayaa in Ogaysiis kasta ama dalabyada lacageed ee lasoo dalacayo iyadoo lagu salaynayo heshiiskan lagu dalici karo damiinka ilaa uu kiraystuhu gaadhayo da'da 18.

Wakaalado u dhaqmaya inay matalaan Koonsilka

Qayb kamid ah xuquuqda iyo masuuliyadaha ee hoos imanaya heshiiskan ayaa laga yabaa inay adeegsadaan ama ay bixiyaan wakaalado kale oo matalaya Koonsilka. Wakaaladahaasi waxa laga yabaa inay fulinayaan heshiiskan iyagoo matalaya Koonsilka deegaankawaxaana kamida kasoo qaadida lacagaha bislaaday.

Xeerarka iyo shuruudaha mudada kiradaada

Koonsilka ayaa kaa kireynaaya aqalka adiguna aqalka ayaad kireysataa mudo kiro toddobaad kasta ah laga bilaabo wakhtiga ku qeexan Taariikhda Bilowga Kirodu oo shuruudahan ku xidhan:

Qodobka 1: Masuuliyadaha Kiraystaha

Sawirada aqoonsiga

1.1 Waa in aad ku raacdaa Koonsilka deegaankaama wakaalada maamulaysa inay kaa qaadan sawir bilawga mudada kiradaada, isla meesha uu markaa Koonsilku ama wakaaladiisa maamul uu ku cayimo, iyo in si joogto ah mudadiiba (taasoo uu Koonsilku kuu cayimi doono tusale ahan inta lagu guda jiro baadhitaanka mudada kirada). Nuqulka sawirkaaga ayaa lagu kaydin doonaa faylka aqalka iyo kaydka la galiyo koonbuterka oo uu Koonsilku hayo iyada oo ay wakaaladihiisa maareyntu isticmaali/gali karaan.

Inla bixiyo kirada

1.2 Waa in aad bixisaa kirada oo dhamaystiran (taas oo laga yaabo inay kujiraan xisaabad kale) ee aqalkaaga todobaad kasta adigoo qadimaayana isniinta. Hadii aad hesho Kabida Aqalka waa masuuliyadaada in aad u sheegto waaxda Kabida Aqalka hadii xaaladahagu isbadalaan taas oo saameyn karta xaqa aad taagerada u leedahay. Kirada dhamaystiran ayaa laga yabaa in uu isbadal kusameeyo Koonsilku sida lagu qeexay jumlada 3.1 ee heshiiskan.

Inla bixiyo daymihii hore

1.3 Waxa kale oo ay tahay in aad bixiso wax dayn kiro ah iyo/ama xisabaad taas oo lagugu lahaa markii aad ku noolayd ciwaankii hore (haday taasi jirto). Waa in aad bixisaa waxa lagugu leeyahay si toosa ama waa in aad bixiso adigoo u eegaya dib ubixintii qorshaysnayd ee lagugula heshiiyay Koonsilka deegaanka ama dib ubixintii ay soo amartay Maxkamadu.

Isticmaalka aqalkaaga

1.4 Waa in aanad u isticmaalin aqalkaaga wax kasta oon ahayn meel adiga iyo qoyskaagu aad ku noolataan.

1.5 Waa in aanad u adeegsan ama u ogalaan qofkastoo kulanool ama ku soo martiyay ama cid kamida martidaada, inay u adeegsadaan ganacsi aqalkaaga adoon marka hore helin qoraal ogalaanshiyaha Koonsilka deegaanka ah: Koonsilku waa in aanu si aan suurto-gal ahayn kuugu diido ogalaanshiyahaas. Hadii kadib Koonsilku ogalaanshiyahii uu kusiiyay uu ganacsigu keeno rabshad, Koonsilku wuxuu kusiin karaa qoraal ogaysiis ah inuu kaala noqday ogalaanshiyihii. Kadib ogaysiiskaa lasoo qoray marka laguu keeno, wixii dhaqdhaqaaq ganacsi ah waa in aad si dhakhso ah ujoojisaa.

1.6 Waa in aad isticmaashaa dagtaana aqalkaaga sidii uu yahay kaagii kaliya ama aqalkii kuugu muhiimsanaa.

1.7 Waa in aad usheegtaa Koonsilka deegaanka hadii aad kamaqnaanayso aqalkaaga mudo kabadan 6 todobaad.

1.8 Hadii gurigaagu uu kudhexjiro koox hanti guryo ah (sida dabaq), taas oo aad ku gashay heshiiska jaarka wanaagsan ama xeerka iyo shuruudada dabaqa, kadib xeerarkan iyo shuruudahan ayaa ka mid noqon doona qayb shuruudahaaga kiraysiga. Nuqul xeerarkan iyo shuruudahan dheeraadka ah ka mid ah ayaa laguu diyaarin doonaa bilowga kiraysigaaga. Jabitaan kasta oo lagu sameeyo xeerarkan iyo shuruudahan waxa ay noqon doontaa jabin lagu sameeyay xeerarka iyo shuruudaha mudada kiraysiga. Koonsilka ayaa bedali kara ama wax ka saari kara heshiiska jaarka wanaagsan ama marmarka qaarkood xayiri kara xeerka iyo shuruudaha, laakiin hadii ay taas dhacdo waxa lagu ugu yaraan 14 cisho gudahood lagu siin doonaa ogaysiis qoraal ah oo isbedelka/isbedelada ah.

Wargalinta isbadalka dadka kugula nool aqalka

1.9 Waa in aad isaga oo faahfaahsan 7 cisho gudahood ugu soo sheegtaa Koonsilka wixii isbadal ah ee ku yimaada dadka kugula nool aqalka. Waxa uu Koonsilku kaaga baahan doonaa in aad u keento cadayn aqoonsi ah.

Xadidaado kusaabsan wareejinta mudada kiradan

1.10 Waa in aanad kuwareejin mudada kiradaada qof kale, ilaa iyoo:

a) aad Haysato xuquuq sharciya ood taas kusamayso:

Kiraystaha Hordhaca ah MA LAHA xuquuqdan.
Waxaad xuquuqdan heli kartaa hadii kiraysato damaanad ah aad noqoto.

(b) waxaad haysataa ogalaanshaha Koonsilka deegaanka aad ku wareejinayso iyadoo lafulinayo amarkii maxkamadu ay ku dabaqday:-

(i) Qodobka 23a ama 24 ee Xeerka Sababta Guurka 1973,
(ii) Qodobka 17(1) ee Xeerka Guurka iyo Nidaamka Wax-qabadka Qoyska ; ama
(iii) jumlada 1 ee jedwal 1 ee Xeerka Carruurta1989.

c) Waxaad haysataa ogalaanshaha Koonsilka ee aad ku wareejinayso qof u qalma inuu lawareego mudada kiradaada hadii aad si dhakhso ah u dhimato ka hor inta aanad wareejin.

Kiraystaha Hordhaca ah MA LAHA xuquuqdan.
Waxaad xuquuqdan heli kartaa hadii kiraysato damaanad ah aad noqoto.

Siikiraynta iyo qayb kamid ah kirayn

1.11 Waa in aanad sii kiraynin dhamaan ama qayb kamid ah daganaanshaha dhamaan aqalkaaga.

1.12 Waxa laga yabaa in aad sii kirayso dhamaan ama qayb kamid ah daganaanshaha kaliya (tas oo ah inuu kireeyahaagu ufahmayo qofkasta oo kawayn da'da 18 iyo qofka aan kamid ahayn qoyskaaga) hadii aad hore u heshay qoraalka ogalaanshiya Koonsilka kuugu qoreen in sidaa lasameeyo: Koonsalkuna maaha inuu sabab la'aan kuugu diido inuu kusiiyo ogalaanshaha. Koonsilku wuxuu kuu diidi doonaa ogalaanshaha hadii ay keento inuu aqalkaagu sharci ahaan buuxo.

Kiraystaha Hordhaca ah MA LAHA xuquuqdan.
Waxaad xuquuqdan heli kartaa hadii kiraysato damaanad ah aad noqoto.

Xaalada Aqalkaaga

1.13 Bilawga mudada kiradaada, ama meel aad dhaxashay mudada kirada ama laguu ogalaaday mudada kirada xaalado ay ansixiyeen xeerarka iyo shuruudaha jira, waxaad ku aqbashay aqalkaaga xaaladiisa uu hada ku sugan yahay, (marka laga reebi wixii cusboonaysiin ah taas oo ah masuuliyada Koonsilka iyad oo loo eegayo qodobka 2.2 ilaa 2.4) xitaa beerta. Hadii aanay beerta xaaladeedu nidaamsanayn una qodnayn si ku haboon xiliyada, kuna jirto jaritaanka dooga ee joog wanaagsan, adaa lagaaga baahan yahay in aad ka dhigto beerta mid u dhiganta heerka la iskaga baahan yahay wakhtiga lagugula heshiiyay gudahiis.

1.14 Waa in aad gudaha gurigaaga nadiifadiisa ilaalisaa oo uu si fiican u qurux badanyay, hadii koonsalku ubaahdo inuu kaqabto wax shaqo cusboonaysiin ah aqalkaaga, waa in aad u banaysaa cida uu lasoo heshiiyay Koonsilku dhamaan meelaha in laga shaqeeyo ubaahan. Waa in aad ka qaadaa waxa meeshaas kujira, aykamid yihiin in laqaado karbadada, hadii loobaahdo in laga shaqeeyo. Koonsilku waxa laga yabaa inuu diido wadida shaqada ilaa iyo wakhtiga aad banaynayso dhamaan meelaha laga shaqaynayo.

1.15 Waa in aad ilaalisaa amaanka gurigaaga wakhtiga oo dhan. Waa in aad usheegtaa Koonsilka ama wakaalada u maamulaysa aqalka haday furayaashu kaa lumaan. Koonsilku waxa laga yabaa inay adiga kuxisaabiyaan kharashka ku baxa badilada qufulada iyo furayaasha cusub.

1.16 Waa in aanad ogalaan xaalada aqalkaagu inay ku keento jaarkaaga rabash iyo karaahi.

1.17 Waa in aad ku ilaalisaa aqalkaaga mid kamadax banaan walooyinka, jiirarka iyo cayayaanada kale. Hadii uu aqalkaagu noqdo mid qashina, waa in aad qaadaa ficil dagdag ah si aad ula tacaasho dhibaatada. Waa in aad usheegtaa Waaxda Caafimaadka Deeganka ee Koonsilka sida ugu dhakhsaha badan ee ugu suurto-galsan. Hadii aad uga baahato caawin

Waaxda Caafimaadka deeganka ee Koonsilka, waxa laga yaabaa in lagu xisaabiyo adeegyadooda.

1.18 Waa in aanad wax yeelin ama aanad soo fara galin ama aanad badalin laydhka ama gaasta, rakibida ama saacada u adeeta aqalkaaga ama dabaqaada.

Goglida dhulka

1.19 Hadii aqalkaagu uu dabaq dhulka sibidhka ah kasareeya, waa inaa raadisaa ogalaanshiyaha Koonsilka ka hor inta aanad ku xidhin gogol ama jeexin iyo looxa sagxada dhulka ku samaysan. Hadii aad dhigto ama jeexdo ood jabiso sagxada looxa dhulka ku samaysan adiga oo aan ogalaanshiyo haysan, Koonsilku waxa laga yaabaa inay kaaga baahdaan in aad ka qaado meesha.

1.20 Hadii ogalaanshiyo laguu siiyo ku xidhida gogasha ama jeexida iyo looxa sagxada dhulka ku samaysan ah ee aqalkaaga taas adaa u qoolnaanaya ku xidhida dahaadh kufilan oo qanciya Koonsilka deegaanka si looga hortago shanqadh u wareegta hantida jaarka.

1.21 Hadii ogalaanshiyo laguu siiyo ku xidhida gogosha ama jeexida iyo looxa sagxada dhulka ku samaysan ee aqalkaaga lakiin kadib fikrada Koonsilku, ay tahay in ay kobcinayso ama kordhinayso shanqadh rabshada jaarkaaga, iyadoo ay kujirto shanqadh rabshada nolosha maalinlaha ah, Koonsilku waxa laga yabaa inuu kaaga baahdo in aad iyada ka qaado meesha. Xaaladahan oo kale Koonsilka deegaanka laguma yeelan doono wixii kharashaad lagaga qaadayo ama lagusoo badalayo sagxad qaabkale ah oo lagu dahaadho.

1.22 Hadii shaqooyinku ay u baahdaan in laga sii wado aqalkaaga kaasoo ubaahan wax gogala ama jeexdin iyo looxa sagxada dhulka in laqaado ama lagu badalo dhuldhig nooc kale ah, Koonsilka laguma yeelan doono kharashaadka lagu badalayo ama kharashaadka lagu soo dhigayo.

Beerta

1.23 Hadii aqalkaaga ay kutaal beer, ama aad la wadaagto isticmaalka beerta kiraystayaasha aqalada kale ee dabaqaaga ah, waa in aad ku ilaalisaa beerta nedaam iyo beerid, iyada oo lala eeganayo xiliyada. Taas o ay ku jirto jaritaanka dooga ee joog wanaagsan sida ah arigtida Koonsilka.

1.24 Hadii wax geedo ahi ku yaalan beerta, waa in aanad wax shaqo ah kaqaban geedaha adoon markii hore ogalaanshiyo qoran kahelin Koonsilka.

1.25 Hadii aanad dayac tiring beertaada ama beerta aad wadaagto, Koonsilku waxa laga yabaa inay iyagu qabtaan shaqada, lakiin waxa lagu xisaabin doonaa adiga kharashaadka shaqada beerida laguu qabtay.

1.26 Waa in aanad ku kaydsan xashiishka, qalabka guriga ama wixii fool xumo leh beertaada gudaheeda (hadaad leedahay mid) ama gudaha wixii beer ama meelo kale ood aad la wadaagto kiraystayaal kale.

1.27 Waa inanad kadhisin wax buula, geerasha ama aqalka cagaaran hadii aan lagahayn ogalaanshiyo qoran Koonsilka ama wakaalada u maamusha.

1.28 Waa in aanad hoos u qodin beerta gudaheeda inkabadan 0.5 meter ama dhacdo kasta, 3 mitir gudahood wixii qaab gidaar leh ama xuduud leh.

1.29 Hadii add gaar u istimcmalayso beertaada, adigaa ka masuula ah dayactirka wixii dayra ah ee ay leedahay ilaa heer suurto-gal ah, cosbonaysiintana si lamida ah hadii laga maarmaan noqoto. Waa in aad latashataa Koonsilka ama wakaaladooda maamulka si laguu hago. Dhisida dayrka gaarka ahi waa in aanu kabadan dherarkiisu 6ft (ama 1.8 meter).

Khataraha dabka, ilaalinta gaasta iyo gaasta lashito

1.30 Waa in aanad uqaadan aqalkaaga, ama hadii aqalkaagu uu ku dhex jiro dabaq, dabaqa, shaykasta oo laga yaabo inuu qarxo ama keenya khatar dab. Iyadoo shakiga laga fogaanayo, waxa laga yabaa in aanad isticmaalin wax saliida la qaato ah, gaasta lashito ama gaasta ee qalabka aqalka ee gaasta ku shaqeeya marka laga reebo saliida kulayliyaha kujirta ee ku dahaadhan.

Qashinka iyo dib u warshadaynta

1.31 Adiga iyo midwalba oo kula nool waa inuu ka qayb qaataa nidaamka dib u warshadaynta Koonsilka.

1.32 Waa in aad ku tuurtaa dhamaan qashinka aqalka iyo ka dib u warshadaynta xashiishka hab ku haboon oo amaana ah. Qashinka aqalka waa in ladhigaa weelka qashinka, meesha laga tuuro iyo meelaha kale ee Koonsilku ugu talagalay. Xashiishka dib u warshadaynta waa in ladhigaa kiishka ugu haboon eey keeneen Koonsilku.
Shaynaba qashinka lagama soo tuuro daaqada aqalkaaga.

1.33 Waa in aanad ku kaydsan ama ku ururs an qashinka aqalkaaga gudihiisa.

1.34 Qashinka aan ahayn ka aqalka waa in loo nidaamiyaa sida ku haboon lagamana yaabo in laga tago meelaha loogu talo galay qashinka aqalka oo kaliya.

Meelaha lawadaago iyo nadiifinta kaabadaha

1.35 Haduu aqalkaagu ku dhexyaal dabaq, waxaa lagaaga baahan yahay in aad nadiifiso, meelaha la iskugu yimaado kiraystayaasha kale iyo kuwa heshiiska kujira, qaybahaas kamidka ah dabaqa kuwaas ood wadaagtan kiraystayaal kale tusaale ahaan kaabadaha iyo dhulka sare ee kabadaha.

1.36 Waa in aad ilaalisaa dhamaan meelaha lawadaago, oo ay kamid yihiin iridaha, kaabadaha la iskaga gudbo, wadiiqoyinka iyo dhulka sare ee kabadaha ee kamadax banaan xidhnaanshaha. Waa in aanad kaga tagin wax qofi leeyahay ama qashin yaala meelaha lawadaago, kuwaa kadib marka loo

eego qodobka 1.32 ee heshiiskan. Lagama yaabo in aad ku kaydsato shaynaba wuxuu doono ha ahadee meelkamida gidaarka kaabadaha ama kabadhada laqaato.

1.37 Waa in aanad faraha lagalin ama ka sooqaadin wax qalabka badbaada dabka ah meelaha la wadaago.

1.38 Waa in aanad ku cabin sigaar ama u ogalaan qofkasta kasoo kula nool adiga ama soo martiyay aqalkaaga inuu ku cabo sigaar meel udhaxaysa meelaha lawadaago.

Meelaha saqafka sare ah

1.39 Hadii aqalkaagu uu ku yaalo dabaq, waa in aanad galin ama ku kaydsan wax mulkiyad ah, oo ay kamid yihiin anteenada TV, meelaha saqafka adiga oo aan kooncilka

Xayawaanka aqaljoogta ah

1.40 Waxa laga yaabaa in aad haysato bisad ama ay ama wixii kale ee xayawaan kula daga aqalkaaga, waxa lagu farayaa marka hore ka hel ogalaanshiyaha Koonsilka. Uma baahnid ogalaanshiyaha Koonsilka deegaanka hadii uu yahay Hage la isla yaqaan ama Ayga Garaaca dhagaysta.

1.41 Hadii aad haysato bisad ama ey ama wixii kalee xayawaana ee kuladagan aqalkaaga, ama ogaalato bisada ama ayga ama wixii kalee xayaawaanka aqaljoogta ah inay soo martiyaan aqalkaaga, waa in aad ku ilaalisaa xukun. Waa in aanad u ogalaan inay wasakheeyaan aqalkaaga (waa in aad u isticmaasha dhalaha saxaarado meesha laga maarsan waayo) ama degmo ahaan halkuu kuyaal aqalkaagu (tusaale wado saaranyay, wadocageed, ama meel lagu ciyaaro) ama hadii aqalkaagu uu kudhexyaalo dabaq, meelkastood lawadaagto jaarkaaga. Hadii bisadaada ama aygaaga ama xayawaanka kale ee kuladagan ay wasakheeyaan aqalkaaga, degmo ahaan ama meel lagula wadaago, waa in aad nadiifisa sifiicana u nidaamisaa wixii saxaro xayawaana.

1.42 Waa in aanad ogalaan waxii xayawaana eed haysato ama ogalaan inay soo martiyaan aqalkaaga inay ku keenan rabash, karaahi ama arbush jaarkaaga ama shaqaalaha Koonsilka, wakaaladooda ama qandaraaslayda. Dhamaan ayda waa in lagu hayaa silsilad wakhtiga oo dhan inta uu kusuganyahay hantida Koonsilka deegaanka ee lawadaago

1.43 waxa laga yabaa in aanad wax xayawaana uhaysan ujeedo ganacsi in aad udhaqayso.

Dabeecada

1.44 Waa in aanad u isticmaalin gurigaaga ama meel uun hantida Koonsilka, meel udhaw aqalkaaga, ujeedooyin sharci daro ah ama mooral jaba. Sil amida ah, waa in aanad u ogalaan qofka kale oo kula nool ama kusoo martiyay inuu u isticmaalo aqalkaaga ujeedooyin sharci daro ah ama mooral jaba.

1.45 Waa in aanad ku keenin rabash, karaahi ama arbush jaarkaaga ama qofkale oo ku dhexnool degmada aqalkaaga.

1.46 Waa in aanad ku dhiiri galin ama u ogolaan midkastoo kula nool ama soo martiyay inuu ku keeno rabash, karaahi ama arbush jaarkaaga ama qofkale oo ku dhexnool degmada aqalkaaga.

1.47 Waa in aanad isticmaalin ama dhiiri galin ama u ogalaan mid kula nool ama kusoo martiyay inuu isticmaalo rikoodhka cajaladaha lagu dhagaysto, raadyowyada, rikoodhka cajaladaha lagu duubo, tiifiiyada, cajaladaha CD yada, ama qalabka musiga lagu dalaco, sameecadaha ama qalabka muusiga ah oo noocwalba leh oo hab uun u cadho galindoona dadka ama sidaa oo kale ay kamaqli karaan aqalkaaga dibadiisa.

1.48 Waa in aanad isticmaalin wax aaladaha aqalka ah ama qalabka wax lagu cusboynaysiiyo ama lagu sameeyso (DIY) hab uun ama wakhtiyada (tasoo ah wixii kadanbeeya 10 fiidkii iyo wixii aan ka horayn 8 aroortii) taasoo ku keeni karta rabashad iyo karaahi jaarkaaga.

1.49 Waa in aanad qofna aflagaadayn ama u ogolaan mid kula nool ama kusoo martiyay inuu aflagaadeeyo qof kamid ah degaanka aqalkaaga. Aflagaadadu waxaa kamida aflagaado ay asaas utahay ama ku tacaluqa da'da, naafada ah, qabiilka, diinta, jinsiga ama jinsiyada ahan. Tusaalayaal ah nooc dabeecadeed kuwaasoo lagu xidhiidhinayo aflagaadadu waa

1.49.1 rabshado ama hajabaado wata rabshad;
1.49.2 cay afka ah ama aflagadayn;
1.49.3 inla waxyeeleyo ama lagu hanjabo in lawaxyeelaynayo qofkale aqalkiisa ama hantidiisa;
1.49.4 qoraal darbi lagu qoro kasoo loogu hanjabayo, lagu caayayo ama lagu aflagaadaynayo;
1.49.5 udhaqanka hab kaas ood ogtahay inuu niyad jabinayo, ama arbushayo, ama ku keenaya carqalad qof kale;
1.49.6 wixii dhaqana ama ficila kasoo lagu baqdin galinayo caafimadka maskaxda ama jidhka, iyo/ama badbaadada iyo/ama xasiloonida, iyo/ama dareenka jiritaanka fiican ee qofkasta oo kale.

1.50 Waa in aanad ku keenin dhaawac hantida Koonsilka meel walbaa haku dhacaane, ama wax lagu qorqoro darbigeeda dushiisa.

1.51 Waa in aanad ku dhiiri galin ama u ogolaan qof kale inay ku keenan dhaawac hantida Koonsilka meel walbaa haku dhacaane, ama wax lagu qorqoro darbigeeda dushiisa.

1.52 Hadii aad dhaawacdo wax kamid ah hantida Koonsilka, ama aad wax ku qorto darbigeeda, ama aad dhiiri galiso ama aad u ogalaato mid kale inuu sidaa sameeyo, waa in aad kabixisaa Koonsilka kharashaadka suurto-galka ah ee lagu cusboonaysiinayo dhaawacaas, ama lagag biinayo qoraalka darbiga, isla marka ay Koonsilku kaa dalbaan lacagta.

1.53 Waa in aanad isticmaalin ama ku hanjabin rabshad ka dhan ah ama cay cid shaqaalaha Koonsilka ah ama wakaaladiisa ama qandaraaslayda, ama cid xubin ka ah Koonsilka. Hataa, waa in aanad dhiiri galin ama u ogalaan mid walba oo kula nool ama kusoo martiyay inuu isticmaalo ama ku hanjabo rabshad ka dhan ah ama cay cid shaqaale Koonsilka deegaankaah ama wakaaladiisa ama qandaraaslayda, ama cid xubin ka ah Koonsilka. Xubin kamida Koonsilka deegaankashaqalihiisa ama wakaaladiisa ama qandaraaslayda maaha inay isticmaasho ama ku hanjabo rabshad ka dhan ah ama cay adiga ama mid walba kula nool adiga ama kusoo martiyay

1.54 Waa in aanad isticmaalin ama ku hanjabin rabshad ka dhan ah ama aflagaado qofkale kasoo kula nool adiga ama kasoo kusoo martiyay.

U ogalaanshiiyaha dadka uu koonsilku usoo igmay inay aqalkaaga yimaadan

1.55 Waa in aad u ogalaataa inay soo galaan aqalkaaga qofkasta oo ushaqaynaya goalaha iyo qofkasta oo kale kasoo Koonsilku u ogalaaday inuu soo galo aqalkaaga, ilaa iyo sida uu Koonsilku hore kuugu sheegay markay dadkaasi kuu yimaadan, mana imanayaan wakhti aan suurto-gal ahayn. Koonsilku waxaa uu u ogalaan doona dadka aqalkaaga imanaya inay baadhan aqalkaaga iyo/ama inay jeegareeyan xaaladiisa iyo/ama inuu baadho in dib loosiikireeyay iyo/ama in laga wado wixii shaqo ah isaga ama wixii hanti ah ee udhaw ama ku xiga aqalkaaga taas oo uu Koonsilku leeyahay. Dhamaan shaqaalaha Goluha, shaqaalaha wakaaladooda maamul iyo qandaraaslayda loosoo igmay waxay sidan doonan kaardhka aqoonsiga ee sawirka leh wakhtiga oo dhan. Waxa laga yabaa in aad baadho kan ka hor inta aanad u ogalaan iyaga inay soo galaan aqalkaaga.

1.56 Xaaladaha degdega ah gudahooda waa in aad u ogalataa gudaha aqalka dhamaan shaqaalaha Koonsilka, shaqaalaha wakaladooda maamul iyo qandaraaslayda loosoo igmay hataa hadii aanu Koonsilku hore kuugu soo sheegin. Waxa aad ku raacaysaa in xaalada dedega ah gudaheeda Koonsilku uu heli doono inuu isticmaalo, iyadoo qufulka labadalayo hadii laga maarmi waayo, hadii Koonsilku uu awoodi waayay inuu helo ogalaanshahaaga in la isticmaalo.

1.57 Ugu yaraan mar kamida laba iyo tobanka bilood ee sanadka, hadii ay halkaa taalo gaasta shoolada gudaha aqalkaaga, waxaa lagaaga baahan yahay in aad hubino isticmaalka aqalkaaga taas darted inuu Koonsilku qabto jeegarayn baadbadada gaasta ah. Taasi aadbay muhiim utahay maxaa yeelay caafimaadkaaga iyo badbaada'daada khatarbay kujirtaa hadii aan tan lajeegarayn. Waxa hore lagu siin doonaa ogaysiis qoran oo ah tariikhda marka loo baahan yahay in aad ogolaansho bixiso. Hadii aad ku guuldaraysato in aad ogolaansho bixiso marka loo baahdo, waxa aad si aan cadaan ah aad kuraacday inuu Koonsilku uu helay isticmaalka gurigaaga isagoo awood kusoo galaya si uu uga shaqeeyo hubinta amaanka gaasta, iyada oo markii hore lagu siiyay ogaysiis qoraala ah in aan kayarayn 48 sacadood. Ogaysiiskan ayaa lakeeni donaa iyadoo gacanta lagu sido aqalkaaga. Hadii ay dhacdo in awood lagu soo galayo, waxa uu Koonsilku dib kuug xidhi donaa aqalkaaga waxaanu samayndonaa qorshayaal uu kugu

siinayo furayaasha cusub. Adigaana lagu xisabindoonaa kharashaadkii awoodii lagu galay, badalida qufulada iyo furayaasha cusub.

Usheegida koonsilka deegaanka wixii kusaabsan cusbonaysiin

1.58 Waa in aad war galisaa Koonsilka sida ugu dhakhsaha badan uguna suurto-galsan wixii cusboonaysiin ah ee loo baahan yahay hadii ay tahay masuu liyadaha Koonsilka sameeyanta cusboonaysiintaa. Hadii aanad soo wargalinin cusboonaysiintaas sida ugu dhakhsaha badan eey tahay in aad yeesho iyadoo taasi kadhigaysa mushkilada mid adag ama qaaliya in la cusbonaysiiyo ama keenaysa mushkilad kale taasoo noqonaysa in Koonsilku uu hadana cusbonaysiiyo, waa in aad kabisaa Koonsilka kharashaadka dheeraadka ah eey gashay.

1.59 Waa in aad raacdaa Koonsilka habkiisa loo wargaliyo cusbonaysiinta taas oo la casriyeeyo wakhtiba wakhtiga ka danbeeya. Wakhti kasta habka cusbonaysiinta waa la casriyeeyaa, habkii hore ee cusbonaysiinta laguma sii wadayo. Waxaanu kuu sheegi doona marka habka wargalinta cusbonaysiintu isbadasho.

Walxaha laga soo tuurayo aqalka

1.60 Haduu aqalkaagu ku dhexyaalo dabaq, waa in aanad kasoo tuurin shay (walxo) ama u ogalaan qofkale inuu kasoo tuuro shay (walxo) aqalkaaga, ama meelaha kale eed lawadaagto jaarkaaga.

U ogalaanshaha inay soo galaan dad aanad garanayn

1.61 Hadii aqalkaagu ku dhexyaalo dabaq, waa in aanad u ogolaan qof kasta oo aanad garanayn inuu soogalo meelaha xidhan eed lawadaagto jaarkaaga, ilaa ood garanayso qofkaasi inuu yahay qof ay usoo xilsaartay Koonsilku inuu galo meeshaas iyadoo lagu salaynayo jumlada 1.55 ama 1.56 ee heshiiskan ama uu xubin kayahay adeegyada xaalad degdega.

1.62 Waa in aanad hawlgab kadhigin aaladaha qufulma, xayirin ama cidhiidhi kadhigin meel furan ama hadii kale aanad fara galin wax lawaago ama amaanka dabka ama albaabada laga soo galo ee la ilaaliyo.

Baarkinka gawaadhida kale iyo cusbonaysiinta baabuurta

1.63 Adiga iyo qofkasta oo kunool aqalkaaga, hataa hadii ay kaliya ugu noolyihiin halkaas si kumeelgaadha, iyo soo martiye kasta aqalkaaga, waa in aanu:

1.63.1 ku baarkin garayn wixii gaadiida ah (ay kujirto gawaadhida sida aqalkookale ah) meelkasta, marka laga reebo meelaha baarkinada calaamadeysan ee ku yaala dibada aqalkaaga, ama hadii aad kunooshahay dhulbalaadhan, meelkastoo kale oo kamid ah dhulkaas. Gaadiidka ku baarkin garaysan meelaha baarkinada calaamadeysan ama dibada ama dhulbalaadhan, waa inaanay ku keenin qofkasta oo kale rabash iyo inaanay joojin wixii gadiid kale ah ama dad ah kuwaasoo oo si fidud oo amaana ah loo dhaafi karo. Koonsilku

wuxuu haystaa xuquuqda uu ku qaadayo wixii gaadiida ee yaala hantida Koonsilka kasoo keenaya xayiraad iyo inlaga yaabo in lagu xisaabiyo adiga kharashaadka laga qaadayo.

1.63.2 ilaa inta uu Koonsilku kuu sheegayo hadii kale qoraal jiro, wadooyinka dhulalka balaadhan maaha meel loo calaamadiyay baarkin. Sikastaba ha ahaatee, waxa laguu ogalaan doonaa in aad ku baarkin garayso meelaha wadooyinka ah ee kuyaala dhulka barxadi ilaa iyo inta uu gaadidkaagu aanay ku keenayn qofkasta oo kale rabash iyo inaanay joojinin wixii gadiid kale ah (aykamid yihiin gadiidka ambalaaska ah) ama dadka socda ama isticmaalaya gaadhi curyaanka inay kudhaafaan sifudud iyo amaan. Koonsilku wuxuu haystaa xuquuqda uu kuqaadayo wixii gaadiida ee yaala hantida Koonsilka deegaankakaas oo keenaya xayiraad iyo in laga yaabo in lagu xisaabiyo adiga kharashaadka lagu qaadayo.

1.63.3 waxa lagu baarkin garaysanayaa ugu badnaan 1 saac ama in taa kabadan oo 3 saacadood guud ah maalintii kastaba, wixii baabur waawayna, gaadiidka tujaariyada ama ganacsiya beerta gudaheeda, ama meelkasta oo kale oo kutaal barxada halkaas oo aqalkaagu yahay, ay kujirto meelaha loo calaamadiyay baarkin ahaan ama meelaha kale ee hantida Koonsilka.

1.63.4 ku baarkin garaynta aan lahayn ogalaanshiyo saxa, oon ahayn dadka degan ama martidooda, halkaas ooy kashaqaynayso nidaamka baarkin garayntu. Koonsilku wuxuu haystaa xuquuqda uu ku qaadayo wixii gaadiida ee ku baarkin garaysan hantida Koonsilka kasoo khilaafaya habkii baarkin garaynta.

1.63.5 haysashada gaadiidka cashuur la'aanta ah (aykujirto wixii dariiqa laga saarey Statutory of Road Notification [SORN] vehicles) ama dariiqa mari Karin ee yaala qolqolkaaga, beertaada, meesha lagu barkingareeyo ama meelkale oo kasta oo kutaal barxada meesha uu aqalkaagu yahay ama hantida kale ee Koonsilka. Koonsilku wuxuu haystaa xuquuqda uu ku qaadayo wixii gaadiida ee ku baarkin garaysan oo khilaafsan qodobkan. Koonsilku waxa laga yabaa inuu ku xisaabiyo adiga kharashaadka qaadidiisa.

1.63.6 ku ilaali ama ku baarkingaree mootada (mootoyinka) aqalkaaga gudahiisa, ama, haduu aqalkaagu uu kudhexyaalo dabaq, meelkastood aad lawadaagto jaarkaaga ee kuyaal meelaha lawadaago hadii aad ku nooshay dabaq ama guri weyn.

1.63.7 fulinta cusboonaysiinta waxku oolka ah ee gaadiidka ama ka shaqaynta hab walba ah ee ka ganacsiga cusboonaysiinta gaadiidka midkood aqalkaaga (eey kujirto wixii geerasha, beera ama qolqolka) ama wadooyinka waawayn (eey kujirto meesha laguugu qoondeeyay baarkinka haday jirto) ama meelaha hantida Koonsilka ah.

1.63.8 ku haynta wixii dhaawaca, ama fool xumo leh ama khatara ah mootooyinka ama qaybaha mootooyinka ee qolqolkaaga, beertada, meesha baarkinkaaga ama meelkale oo kasta oo kuyaala barxada meesha aqalkaagu yahay ama meelkasta oo kamida hantida

Koonsilka. Koonsilku waxuu haystaa xuquuqda uu kuqaadayo wixii sida gadiidkaa ah ama qaybaha gaadiidkaa iyadoo laga yaabo in lagu xisaabiyo adiga kharashaadka rarkiisa.

1.63.9 ku baarkin garee xuduuda baarkinka hawlgabka ah ee laqaabeeyay ilaa iyo xuduuda baarkinka isticmaalkaaga laguu qoondeeyay.

1.63.10 isaga tagid wixii gaadiid aan ladoonayna, gawaadhida sida aqalkoo kale ah ama boodhka meelkastoo kamida hantida Koonsilka. Koonsilku waxuu haystaa xuquuqda uu kuqaadi karo waxkastoo sida gaadhiga ah iyadoo laga yaabo in lagu xisaabiyo adiga kharashaadka rarkiisa.

Dhamaadka mudada kirada

1.64 Waa in aad ka rartaa dhamaan hanta shaqsiyadeeka, ay kujirto wixii qashin ah, iyo in aad kaga tagto aqalkaaga duruuf iyo xaalad caqli gala dhamaadka mudada kirada. Waa in aad hubisaa in aanad cidna kaga tagin aqalkaaga. Waa in aad u keentaa furayaasha aqalkaaga Koonsilka ama wakaaladiisa maamul. Waxaa laga yabaa in lagu xisaabiyo kirada ama xisaabadka daganaansho ama isticmaal ilaa iyo furaha lahelayo iyo/ama lasoo bandhigayo mulkiyad madhan.

1.65 Hadii aad kaga tagto wax hanti shaqsiyadeeda aqalkaaga kadib dhamaad mudada kirada, waxa aad si toos ah ugu raacsantahay alaabtaas inay u wareegi doonto Koonsilka kuwaas oo laga yaabo inay soo saraan alaabta iyadoonay jirin latashi dheeradi.

Qodobka 2: Xuquuqqahaaga

Aqoonsiga shaqaalaha Koonsilka, wakaaladahooga maamul iyo qandaraaslayda

2.1 Dhamaan shaqaalaha Koonsilka, shaqaalaha wakaaladooda maamul iyo qandaraaslayda lasoo diray waxay sidan doonaan kaadh aqoonsi oo sawir leh wakhti kasta. Waxa aad ka codsan kartaa in aad baadho kaas ka hor ogaalnshiyaha iyagu ay ku galayaan aqalkaaga.

Cusbonaysiinta

2.2 Iyada oo la tixgalinayo qodobka 11 ee Xeerka Mulkiilayaasha guryaha kireeya iyo Kiraystayaasha ee 1985, Koonsilku wuxuu leeyahay dhawr waajibaad cusboonaysiin ah kuwaas oo lagu shaaciyay qodobada 2.3 ilaa 2.5

2.3 Koonsilku waa inuu ku ilaaliyaa cusboonaysiin qaabka iyo dibada aqalkaaga (aykujiraan bulaacado, majarooro, iyo beebab dibada ah).

2.4 Koonsilku waa inuu ku ilaaliyaa cusboonaysiin iyo hab sifiican ushaqaynaya beebabka iyo waxyaabaha kale kurakiban aqalkaaga kasoo kusiinaya biyahaaga, gaas iyo qaybiyaha laydhka. Kan waxa kujira saxanka faraxalka ee suuliga, saxanka weelka lagu maydho ee madbakha, baadka iyo musqusha, lakiin kuma jiro alaabaha gurigu taasoo lagaga faa'iidaysanayo gaadhsiintan, tusaale ahaan ofinka ku shaqeeya dabka ama gaasta kaas oo ah masuuliyadahaaga.

2.5 Koonsilku waa inuu ku ilaaliyaa cusbonaysiin iyo hab sifiican ushaqaynaaya habka kulayliyaha ee aqalkaaga iyo habka bixinta biyaha kulul.

2.6 Koonsilku ma cusboonaysiin doono wixii dhaawaca eey keento:

2.6.1 wax kasta oo aad adigu samaysay

2.6.2 dhaawac uu ku keeno qof walba oo kula nool ama qof kamida martidaada (aykujirto labada kiisasba dadka kayar da'da 18);

2.6.3 wixii shaqo ah kasood adigu ama dadka aad masuulka katahay ay sameeyeen, hataa hadii Koonsilku kugu waafaqaan in aad samayn karto shaqadan ama samaysay shaqada;

2.6.4 shaykasta kasoo adiga ama dadka aad masuulka ka tahay ay ku rakibeen aqalkaaga, xataa hadii Koonsilku ku waafaqay taas in laragu rakibi karo

2.7 Marka Koonsilku tixgalinayo in lagama maarman ay tahay in shaqo laga qabto (ama ha ahaato cusbonaysiin ama kobcin) aqalkaaga ay suurto gal noqon weydo inla fuliyo adiga iyo qoyskaaga oo aqalka ku jira, Koonsilku waxay kaaga baahankaraan in aad u guurto degaan kumeel gaadha ah oo uu bixiyay Koonsilku ama mid kamid ah aqalada ay leeyihiin hoy bixiyayaasha degaanka ilaa iyo inta ay qaadanayso in lafuliyo shaqada. Waxaa lagu soo ogaysiin doona marka ay dhamaato shaqadu halkaas oo lagaaga baahandoono in aad kabaxdo degaankii kumeel gaadhka ahaa iyadood dib ugu guuraysid aqalkaaga.

Samaynta badalaadaha iyo fulinta cusboonaysiinta

2.8 lagama yaabo in aad samayso kobcin, badalaado iyo kuradhsiimo aqalkaaga ilaa aad marka hore ka hesho Koonsilka ogalaanshiyo qoraala ah, sida mulkiilaha guryaha kireeya . Si looga fogaado wixii shakiya ama is fahan la'aana, rakibida dhiishka satalaytka ah waa sida koradhsiimo. Koonsilku maaha inuu bilaa sabab kudiido inuu siiyo ogalaanshaha. Waa in aad heshaa oo kale dhamaan qorshayaasha ogalaanshiyo muhiimka ah ee kale iyo dhisida shuruucaha ansaxa ah halka kuwan looga baahan yahay Koonsilka deegaanka sidii qorshayaasha dawlada degaanka.

2.9 Hadii aad fulinayso kobcin, badalid ama kuradhsiimo aqalkaaga la'aanta ogalaanshiyaha Koonsilka, Koonsilku wuxuu kaa codsankaraa in aad kaqaadid kuna soo celisid aqalkaaga xaaladiisii hore taas oo lagu soo samaynayo qoraal. Hadii aanad adeecin codsiga Koonsilka wakhti caqli gal ah gudihiis, Koonsilku waxay ka qaadi karaan kobcinta, badalida ama koradhsiimada iyadoo lagu soo celinayo aqalkaaga xaaladiisii hore. Hadii saas lasameeyo, adaa lagugu lahaan doonaa kharashaadka Koonsilka deegaankakharashaadkiisa suurto-galka ah ee saas lagu samaynayo.

2.10 Adigaa ayaa laga yabaa kharashaadkaaga in aad kufuliso cusboonaysiinta qaabka ama dibada aqalkaaga iyo in lafuliyo rinjiyaynta dibada aqalkaaga hadii adigu marka hore aad ka hesho Koonsilka ogalaanshiyihiisa oo qoraala ah. Ta rinjiyaynta dibada aqalkaaga, Koonsilku maaha si aan suurto-gal ahayn inuu kuugu diido inuu kusiiyo ogalaanshaha.

Kirada lagu saarayo markuu kulayliyahaagu jabo

2.11 Hadii tootalkaaga kirada todobaadlaha ah (eeg jumlada 1.2) ay kujiraan xisaabad dabka ah oo lagu diiriyay booska iyo biyaha, iyadoo adeegan aan labixinayn 48 saacadood ama inkabadan markii ay ahayd in labixiyo, Koonsilku wuxuu, hadii aad ku waydiiso iyadoo qoraala, bixindoona xadi lacageed tasoo la go'aamiyay inay ku haboontay, xisaabtaada kirada

Burinta heshiiskan

2.12 Waxaad gabagabayn kartaa heshiiskan wakhti walba iyada oo lasiinayo Koonsilka deegaanka in aan kayarayn afar todobaad ogaysiis ay kuqorantay gabagabyntu maalin isniin ah.

2.13 Meesha koonsilka looga baahan yahay inuu bixiyo mulkiyad madhan oo aqalkaaga iyo in laguu soo bandhigo kaladorashada deegaanada ku haboon iyo in loo hogaansamo 2.14 oo heshiiskan ah, waxaad banyan doontaa aqalkaaga dhamaadka afarta todobaad ee ogaysiiska.

2.14 Koonsilku waxa gabagabaynkaa heshiiskan hadii:

2.14.1 aad jabiso qodobka 1.6 (waxa aad isticmaalidoonta kuna jirtaa iyadood aanad u daganeyn aqalkaaga sidii uu yahay kaagii kaliya ama aqalkii kuugu muhiimsanaa) ama uu dhigayo 2.12, iyadoo lagusiinayo afar todobaad oo ogaysiin qoraala.

2.14.2 aad jabiso waxuun waajibaadkaaga uu dhigaayo heshiiskani (iyada oo laga reebayo qodobada 1.44 ilaa 1.54) laguna siinayo afar todobaad oo ogaysiin qoraala ah.

2.14.3 aad jabiso wuxuun qodobada 1.44 ilaa 1.54, iyadoo lagu siinayo afar todobaad oo ogaysiisa. Koonsilku waxa laga yabaa go'amadiisa inuu bixiyo ogaysiis dagdag ah kiisas gaar ah.

Isbadalada heshiiskan

2.15 Koonsilku waa in aanu ku samayn wax isbadal ah heshiiskan tasoo hoos uridi karta xasiloonidaada booskan, lakiin qaybkamid ah tan, Koonsilku way badali karaan shuruudaha Heshiiskani inasiinayo taasoo (aanay kujirin kiiska ogaysiinta uu dhigayo jumlada 3.1), iyada oo ay daba socota habkan:

2.15.1 ogaysiis waa inuu soo saraa Koonsilku oo adiga kuu sharaxaya isbadalada uu rabo inuu ku sameeyo jumladaha heshiiskan ama wixii kala tagsanaana ee heshiiskan;

2.15.2 waxa aad siin kartaa faaladaada Koonsilka ee kusaabsan wixii soo jeedin isbadala jumladaha ama heshiiska inta lagu guda jiro 21 cisho ee ogaysiiska lagu soo sheegay jumlada 2.15.1;

2.15.3 hadii Koonsilku go'ansado inuu sameeyo isbadalo kadib markuu tixgaliyo wixii faalo ah ee aad soo samaysay adigu, waa in lasoo saaraa Ogaysiis ah Kaladuwanaanta ku saabsan adiga iyo isbadalku saamaynta u yeelan doono 28 cisho kadib ogaysiiskan.

Qodobka 3: Heshiisyo dheerada oo udhexeeya adiga iyo koonsilka

Isbadalka kirada

3.1 Xadiga lacagta kirada ay tahay in aad bixiso adigu sida uu dhigayo heshiiskani Koonsilka ayaa badali kara hadii ay kusiyaan afar todobaad ogaysiis qoran. Sikastaba ha ahaatee, Koonsilku maaha inuu kusiiyo wixii ogaysiis ah ee koradha tootalka kirada todobaadlaha ah tasoo dhacday iyada oo ay keentay koradh ku yimid xisaabadkii biyaha, xisaabadkii dabka ama wixii xisaabad kale ah ee laxidhiidha adeegyada lawadaago ee labixiyo kuwaas ooy kujiri karaan xanaanaynta, dayactirka dhulka, laydhka lawadaago iwm. Koonsilka waxaa loo ogol yahay inay kaa soo ceshadaan adiga wixii baaqiya ee xisaabkaas ah taasoo kabilaabmaysa tariikhda markii ay xisaabadkaas ugu horayn kordheen.

Adeega ogaysiisyada

3.2 Marka uu Koonsilku kusiiyo ogalaanshiyo aad kusamaynayso shay walba, waxa kaliya uu sharci noqonayaa haday tahay qoraal uu saxeexay ama loo saxeexay matalaha Madaxa Koonsilka ee Adeegyada Guridajinta (Council's Head of Housing Services) ama wakaaladooda maamulka. Wixii ogasiisyo ah ee aad jeceshahay in aad siiso Koonsilka waa inay ahaadaan qoraal waxaanay umuuqandoonan in si kufilan ay u gaadhay hadii aysoo direen boostada kalaaska caadiga ah ee qadinka ah ilaa Council's Head of Housing Services, Cedar Wood House, 2d Fulbourne Road, Walthamstow, London, E17 ama xafiiska diwaangalinta ee wakaaladooda maamul ee ladoortay.

3.3 Wixii ogaysiisa eeytahay in lagu soo gaadhsiiyo adiga waxay u muuqan doonaan inay yihiin kuwo kuu soogadhay sidii larabay hadii lagaga tago aqalkaaga ama boostada caadiga ahi usoo dirto aqalkaaga ama boostada caadiga ahi kaga tagtay ama usoo dirtay ciwaankagii lagaranayey ee ugu danbeeyay.

Daynta shaqsiyadeed iyo ta lawadaago

3.4 Halka laba ama wax ka badan oo qofi ay yihiin kiraystayaal, jumalado kamida heshiiskan ayaa laydinku dabaqaya labadiinaba siwada jirta iyo si shakhsiyadeedba.

Xuquuqda Koonsilka deegaankaee ay 'kubilaaban'

3.5 Hadii wakhti ay dhacdo in baaqi lagaaga yeesho kirada lakiin Koonsilka aad adna lacag ku leedahay la xidhiidha mudada kiradaada, halkii aad sitoosa u heli lahayd lacagta, Koonsilku wuxuu go'ansankaraa inuu kudalaco xisaabadkaga kirada iyada oo laraacinayo lacagta lagugu leeyahay. Waxaanad heli doontaa ogaysiis ah bixinta hadii Koonsilku taas sameeyo.

Horumarinta iyo isbadalada ay keenan Koonsilku

3.6 Koonsilku wuxuu u joogaa inuu kobciyo ama isbadal kusameeyo qayb kasta oo kamid ah aqalka tasoo uu masuul ka yahay in la cusboonaysiiyo.

Hadaad dhimato iyo mudada kiradu inaanay si caadiya ugu wareegayn ka kugu xiga

3.7 Hadaad dhimato iya oo mudada kiradu aanay si caadiya ugu wareegin qof uu sharcigu siiyay inuu badalo mudadii kirada, Koonsilku wuxuu kuracaa taas oo:

3.7.1 la go'aamiyo kordhinta mudada kiradaada ogaysiis ahaana in lajoojiyo kugu wareejintii dhaxal wareejiyaha, maamulka ama dhaxla hantidaada (ama danta guud) ama hadiikale iyo hadakadib

3.7.2 kasoo horjeedo jumlada (3) ee hoose ay usoo bandhigayso lamaanahaaga mudo kiro oo isku heshiisa ay bilaabmayso maalinta tasoo mudada kiradaada ay go'aaminayso iyadoo loo eegayo (1) sare, lanabixinayo in dhamaan shuruudahan soosocda la helo :-

(a) lamaanahaaga kula daganaa dhamaan wakhtigii laba iyo tobankii bilood ee ku dhamaanayey ilaa dhimashadaadii, iyo

(b) lamaanahaaga buuxiya heshiiska siduu uu yahay aqalkisii uu muhiimka ahaa ama kaliya tariikhda dhimashadaada, iyo

(c) laguma damaanad qaadin mudadii kirada shaqadan ee qodobkan ama wixii qodobo ah ee samayn isku mid ah kaga jira mudada kiradii hore heshiikii ay dhigteen dhexdooda the London Borough of Waltham Forest iyo mid kamid ah kiraystayaashooda, iyo

(d) aanad ku dhex jirin qeexida lawareegaha mudada kirada sida uu qeexaya Sharcigii Guriyaynta ee 1985, qodobka 88, iyo

(e) maad haysan marka loo eego mudo kiro oo ah damaanad ah oo sicad loo kala wareejiyay dhawaaqii lasameeyay oo loo eegayso qodobka 88(4) ee Sharciga Guriyaynta 1985 tasoo ahayd mudada kiro bilaa lawareege ah

(f) hadii Koonsilku tixgalinayo in mudada kiro ee leh heshiiska isku midka ah la awoodi waayo, qof fulinaya shuruudaha jumladaha

2(a) ilaa 2(e), deegaan kabaaladhan kuu caqli gal ahaan ubaahan yahay qofkaasi, Koonsilku uma soo bandhig doono qofkaas mudo kiro oo heshiiskeedu isku mid yahay, lakiin waxa loo soo bandhigi doonaa mudo kiro oo heshiisyo kala duwan oo dagaan ka kooban aan ka balaadhnayn ta loo tix galinayo qofku inuu si caqli gala ugu baahan yahay. Mudada kiradaa waxa loo bandhigi in ay bilaabmato taariikhda mudada kiradaadu ay go'aaminayso sidii lagu sheegay jumlada 1 sare.

3.8 Ujeedooyinka 3.7.2 "lamaanaha" waxa kamid ah cida caadiga isku qaba, dumaraka isqaba, raga isqaba, labeebka ama lamaanaha badalay jinsigoodii ee kiraystihii dhintay.

Qodobka 4: Wakaalada maamul ee Koonsilka

4.1 Hadii wakhti walba, Koonsilku doorto in wakaalad maamul si ay ugu shaqayso xagii isaga maamulka gudaha gurigaaga, wixii go'amo ama fikrad ah ee wakaaladooda maamul wuxuu u muuqanayaa inuu noqdo kii Koonsilka.

These Terms and Conditions of the Tenancy Agreement tells you about your rights and responsibilities as a Waltham Forest Council tenant. If you would like to have a copy of this document in your own language, please contact Ascham Direct on 020 8496 4197 and quote AH 199.

This document will also be made available upon request in the following formats. Please ✓ the appropriate box and write your name, address and telephone number and return to the address below.

Audio Tape ☐ Braille ☐ Large Print ☐

টেনেন্সী এগ্রিমেন্ট-এর এই টার্মস এন্ড কন্ডিশন বা শর্তাবলী ওয়ালথাম ফরেস্ট কাউন্সিলের টেনান্ট বা ভাড়াটে হিসেবে আপনার অধিকার এবং দায়-দ্বায়িত্ব সমূহের ব্যাপারে তথ্য দেবে । আপনি যদি এ ডকুমেন্টটির একটি কপি আপনার ভাষায় পেতে চান, তাহলে অনুগ্রহ করে অ্যাসচাম ডাইরেক্ট-এর সাথে AH 199 কৌট উল্লেখ করে 020 8496 4197 এই নাম্বারে যোগাযোগ করুন ।

Bengali ☐

ટેનન્સી એગ્રીમેન્ટ (ભાડાખતના દસ્તાવેજ)ની આ શરતો અને નિયમો તમને વોલ્થમ ફોરેસ્ટ કાઉન્સિલના ભાડૂત તરીકે તમારા અધિકારો અને જવાબદારીઓ વિશે જણાવે છે. જો તમને આ દસ્તાવેજની નકલ તમારી પોતાની ભાષામાં જોઈતી હોય, તો કૃપા કરીને એશકેમ ડાઈરેક્ટનો 020 8496 4197 પર સંપર્ક કરો અને AH 199 જણાવો.

Gujarati ☐

Shuruudahan iyo Xeerarkan ku sabsan heshiisyada kireysiga ayaa kuu cadeynaaya xuquuqda iyo xaqa lagu leeyahey kireystaha guryaha Koonselka ee Waltham Forest. Hadii aad nuqul qoraalkan afkaaga hooyo ku rabto, fadlan la soo xidhiidh Ascham Direct 020 8496 4197 adigoo sheeqaaya AH 199.

Somali ☐

Bu Kira Sözleşmesinin Hüküm ve Şartları, Waltham Forest Belediyesi'nin kiracısı olarak sizin hak ve sorumluluklarınızı açıklamaktadır. Eğer bu belgenin kendi dilinize çevrilmiş bir kopyasını almak isterseniz, lütfen 020 8496 4197 numaralı Ascham Direct hattını arayınız ve AH 199 referans numarasını belirtiniz.

Turkish ☐

یہ کرایہ داری کے معاہدے کے شرائط و ضوابط آپ کو والتھم فاریسٹ کاؤنسل کے کرایہ دار کی حیثیت سے آپ کے حقوق و ذمہ داریوں کے بارے میں بتاتے ہیں۔ اگر آپ کواس دستاویز کی نقل اپنی زبان میں چاہیے، تو برائے کرم ایشیم ڈائریکٹ سے 020 8496 4197 پر رابطہ کریں اورحوالہ نمبر AH 199 بتائیں۔

☐ Urdu

Tenant's name: _____

Tenant's address: _____

Telephone number: _____

Please return to:

Ascham Homes, Policy and Development Team,

1 Wood Street, Walthamstow, London, E17 3JU